MAJALADDA MARAG

Cadadka Labaad | May 2025

# HIJRADA PUNTLAND:
## HALIS LA HILMAANSANYAHAY

Faarax Cusmaan

Bogga: 15




**Xigashada Sawirka:** Wasaaradda Duulimaadka PL

# Qorayaasha Wargayska




**Maxamed Siciid Faarax**
**Safarka RW Xamse ee Sool:** Meeqaam Siyaasadeed iyo Midnimo Qaran 4


**Saalim Siciid**
**Heshiiska Sahaminta Shidaalka ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Turkiga:** Fursadaha iyo Caqabadaha ka Jira 7





**Xildh. Cabdullahi Faarax**
**Geeska Afrika:** Goob Istiraatiiji ah oo Murugsan 11





**Faarax Cusmaan**
**Hijrada Puntland:** Halis La hilmaansanyahay 15





**Dr. Maxamed Cali Faarax**
**Waa kuma hoggaamiyaha siyaasadeed ee guulaystaa?** 18






**Sakariye Ahmed [Rabiica]**
**Aqoonsiga SSC-Khaatumo:** Maxaa Puntland La Gudboon? 22





**Cabdirashiid Maxamed Cabdi**
**Sheeko Qaran:** Halgankii Daraawiishta 24


**Maxamed Nadiif Showkaani**
**Masuuliyadda dadwaynaha (1).** 26





**Maxamed Mire**
Maxaa hortaagan in laga guuleysto Al-Shabaab? 29





**Dr. Cabdisamad Dhunkaal**
**Ka Gudbidda Gargaarka Dibadda:** Maalgashiga Caafimaadka Puntland ee Mustaqbalka Waara 32

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda Labaad ee Majalladda Marag, oo ah madal aan ugu talagalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee nolosha.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Horufadhi Media, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya gaar ahaan dhalinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

**Cabdi Cumar Bile**

Tifatiraha Guud



**Xigashada Sawirka**: SSC-Khaatumo

# SAFARKA RW XAMSE EE SOOL:

## Meeqaam Siyaasadeed iyo Midnimo Qaran

Maxamed Siciid Faarax

Bulshooyinka dega Gobollada Sool, Saanag iyo Cayn (Buuhoodle) oo ku abtirsada Khaatumo iyo Maakhir ee Waqooyiga Soomaaliya waxa ka jiray muddo badan dhibaatooyin ay dadka degaankaasi kala kulmayeen maamulka Somaliland oo ku khasbaayey siyaasado aanay rabin, wuxuuna damac kaga jiray in dhulka ay deggen yihiin uu ka barabixiyo, iyaga oo ku celcelinaaya: "Dadka guuree dhulku ma guuro".

Go'doon siyaasadeed, dib u dhac bulsho, horumar la'aan, dagaallo iyo faragelinno lagu doonaayey in lagu muquuniyo doonistooda, laguna boobo dhulkooda iyo dhibaatooyin kale oo fara badan ayey la kulmaayeen bulshooyinkaasi, iyaga oo dhankooda halgan kaga jiray sidii ay iskaga cabbin lahaayeen siyaasadahaas gurracan.

Loolan dheer kadib, 25-kii Agoosto, 2023-kii ayaa bulshada degaannada SSC-Khaatumo ku guulaysteen in ay iska kiciyaan nidaamkii xogga iyo xeeladda ku joogay degaannadooda inta badan, waxana ay xilligaa intii ka danbeysay u madax-bannaanadeen taladoodii iyo dhulkoodii. Inkasta oo ay weli jiraan culaysyo iyo dagaallo joogta ah oo kaga imanaayey nidaamka Somaliland oo aan weli ka tanaasulin damaciisii ahaa inuu mar kale maquuniyo bulshooyinkaas, haddana waxa ay ahayd fursad weyn oo uu suurtagelisay in ay wax badan doonistooda ku qabsadaan, iyagoona dhistay maamul la dhaho SSC-Khaatumo oo ku meel gaar ah, kuna midaysanyihiin dadka degaankaas.

12-kii April 2025, Raysulwasaaraha Dowladda Federaalka Soomaaliya Xamse Cabdi Barre ayaa safar taariikhi ah ku tegay magaalada Laascaanood, waxana la filayaa in safarkaasi uu saameyn weyn ku yeesho siyaasadda iyo nolosha bulshooyinka ku dhaqan degaannada SSC-Khaatumo iyo Maakhir oo isku duruuf ku jiray muddo badan, marka la eego siyaasadda iyo culeysyada kaga imanaya nidaamka Somaliland oo doonaya inuu khasab kula wareego dhulka labadaas bulsho.

# QIIMAHA SAFARKA RAYSULWASAARAHA EE DEGAANADAAS

Waxa la aaminsanyahay in booqashada Raysulwasaare Xamse iyo wefdiga kala duwan ee la socotay oo ka koobnaa ha'yadaha Dowladda Federaalka Soomaaliya uu ahaa talaabo weyn oo u adeegeysa marka laga eego:

1. Dhanka siyaasadda: Bulshooyinkan ayaa ku ciillanaa masraxyada siyaasadda iyaga oo aan wax cod ah oo saameyn leh ku lahayn fagaarayaasha lagu gorfeeyo siyaasadda iyo danaha bulshooyinka kala duwan ee Soomaaliyeed, taas oo keentay in dhibka ka jiray gobolladan aan si saxan looga doodin, cabashada ay bulshadan qabteyna aan la gaarsiin masraxyada Soomaaliya. Sidaa darteed, safarkan iyo aqoonsiga xukuumada Somaaliya ay siisay maamulka SSC-Khaatumo waxa uu noqanayaa guul siyaasadeed oo weyn oo u suuraggelinaysa gobolladan in codkoodu gaaro masraxayada iyo golayaasha Soomaaliyeed, ugana sii gudbo kuwa gobolka iyo caalamka. Waxa la filayaa in bisha May, 2025-ka uu maamulka SSC-Khaatumo ku biiro shirka Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) oo wax badan oo go'aanno muhiim ah lagu gaaro.

2. Dhanka Dowladnimada: Muddo 30 sanno ka badan, ma jirin wax adeeg dowladeed oo weyn oo ka hirgalay degaannada ay ku nool yihiin bulshooyinka Khaatumo iyo Maakhir, mana heli jirin qoondoonyinka horumarineed ay helaan gobollada kale ee la midka ah, taasna waxa sabab u ah maamulka Somaliland oo kaashanaya beesha caalamka oo hirgeliyay borobagaando ah, "in dhulkaas yahay dhul la isku haysto (disputed area)", markii dadka deggani uu iska diiday fikirkii goonigoosadka, sidaa darteedna, bulshooyinkaas waxa ay arrinkaas ku waayeen deeqaha gargaarka iyo kuwa horumarineed ee beesha caalamku siiso Soomaaliya iyo adeegyo badan oo dowladeed. Raysulwasaare Xamse wuxuu sheegay in degaanadda SSC-Khaatumo

yihiin dhul Soomaaliyeed oo hoostaga Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS), aysana ahayn degaanno la isku haysto, waxa kale oo Xamse ku amray hay'addaha caalamiga ah iyo kuwa qaranka in ay si toos ah uga shaqa galaan dhulkaas, talaabadaas oo guul weyn oo siyaasadeed iyo mid bulsho u ah deegaanadaas. Waxa kale oo DFS magaaladda Laascaanood ka dhagaxdhigtay xarumo maamul iyo kuwa adeeg bixineed, waxaa xariga laga jaray hay'ada "Diiwangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha – NIRA" iyo mid waxbarasho oo bulshada u fududeynaya adeegyada ay u baahan yihiin.

3. Adkeynta midnimada dalka iyo ka hortagidda kala jaridda: Bulshooyinka degaannada Khaatumo iyo Maakhir waxa ay udubdhaxaad u yihiin ilaalinta midnimada Soomaaliyeed iyo ka hortagga qaybinta, waxayna waqti badan iyo naf iyo maalba u hureen in aan mashruuca goonnigoosadku ka hirgelin degaannadooda. Dagaalkii Sool 2023-dii iyaga iyo bulshooyinkii kale ee u soo gurmaday ku waayeen dad badan, in kale oo badanna waa ay ku naafoobeen, barakac iyo burbur bandanna waxa uu ku dhacay dhulkaas, sidaas darteed safarkan waxa uu ka dhignaa in halgan kooda laga abaal mariyey, laguna taageeray qadiyadda ilaalinta midnimada dalka.

4. Rajo gelinta xoogagga isbeddel-doonka ah: Safarkani wax uu yididiilo gelinayaa xoogagga doonaya isbeddelka iyo horumarka, wuxuuna dhiirri gelinayaa dhinacyada ku howlan ka hortagga mashruuca goonnigoosadka iyo wax kabeddelka bulshooyinka gobolladaas, sidaas oo kale waxa uu cashar u noqonaya bulshooyinka kale ee Soomaaliyeed ee doonaya inay wax qabsadaan.

5. Xoojinta nabadda iyo wada noolaashaha bulshooyinka Soomaaliyeed: Xukuumadda Soomaaliya ayaa doonaysay in xal laga gaaro dagaallada joogtada ah, lana furo waddo lagu wada hadlayo si deris wanaag iyo Soomaalinnimo loogu noolaado degaannadaas, maamulka SSC-Khaatumo oo arinkaa ku waafaqayna waxa uu sii daayey 25 maxbuus oo ku xirnaa Laascaanood; si ay u noqdaan astaan muujinaysa in SSC-Khaatumo doonayso nabad iyo deris wanaag.

6. Ka hortagidda faraggelinta Shisheeyaha: Waxa kale oo qodob weyn ahaa in safarkani uu dhabarjabin weyn ku ahaa faraggelinta quwadaha shisheeye ee doonaaya in dalka la kala qaybiyo si ay danahooda uga fushadaan. Waxa si cad safarkan u diidanaa qayb ka mid ah dalalkii hore u guumaysan jiray Soomaaliya oo dano amni iyo kuwo dhaqaale ka leh gobolladan.

**W/Q:** Maxamed Siciid Faarax


Madax HADAF, Badhan- Sanaag



**Xigashada Sawirka:** SSC-Khaatumo

DreamPoint Hotel
Modern . Unique . Affordable
SPONSER





Xigashada Sawirka: Somali Petroleum Authority - SPA

# HESHIISKA SAHAMINTA SHIDAALKA EE U DHEXEEYA SOOMAALIYA IYO TURKIGA:

## Fursadaha iyo Caqabadaha ka Jira

Saalim Siciid

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa 7-dii Maarso heshiis la saxiixatay Dowladda Turkiga, kaasoo shirkadda Turkish Petroleum Corporation (TPAO) si gaar ah ugu xeeraya xuquuqda sahminta, qodista iyo soo saarista shidaalka ku jira saddex qaybood oo ka mid ah badda Soomaaliya, oo dhul ahaan gaaraya 16,000km$^2$. Qaybahani waxay ku yaallaan gunta badweynta Soomaaliyeed, waxaana la rumeysan yahay in ay ku jiraan kheyraad dabiici ah oo ballaaran, gaar ahaan shidaal iyo gaas dabiici ah. Waa heshiis si gaar ah u ahmiyad u leh marka la eego dadaallada socda ee lagu xoojinayo ka faa'iidaysiga khayraadka dabiiciga ah ee dalka.

Heshiiskan, oo ah kii ugu baaxadda weynaa ee noociisa ah tan iyo burburkii dowladdii dhexe ee 1991-dii, wuxuu kusoo beegmay xilli Soomaaliya ay raadineyso maalgeshi dibadeed iyo fursado dhaqaale oo horumarineed. Waxaa laga filan karaa in uu albaab u furo dhaqaalaha dalka, koboca shaqo abuurka, iyo horumarinta kaabeyaasha dhaqaalaha. Si kastaba, heshiiska wuxuu sidoo kale keenay doodo ku saabsan hufnaanta, waafaqsanaanta sharciga, iyo kaalinta ay leeyihiin hay'adaha dastuuriga ah sida Baarlamaanka.

Maqaalkan waxaan ku falanqaynayaa fursadaha iyo caqabadaha heshiiskan ku xeeran aniga oo iftiimin doono faa'iidooyinka waawayn iyo caqabadaha haysta heshiiska ee u baahan in lagu baraarugo.

# FURSADAHA LAGA FILAN KARO HESHIISKA

**Abuurista fursado Maalgashi**

Soomaaliya diiwaan fiican kuma leh gelista heshiisyada maalgashiga ee laba geesoodka ah (Bilateral Investment Treaties) Sida ku xusan mareegta UNCTAD (2024), Soomaaliya waxay saxiixday oo keliya afar heshiis maalgashi laba-geesood ah, kuwaas oo ay la gashay Jarmalka (1981), Masar (1982), Turkiga (2016), iyo Qadar (2018), waxayna badankoodu raacayaan noocyadii hore ee heshiisyada, isla markaana aan si buuxda ula jaanqaadin heerarka casriga ah ee maalgashiga. Marka lagu daro heshiiska hadda ee shidaal sahminta iyo qodista ee Turkiga ay lagashay wuxuu ku biirayaa heshiisyadaa tirada yar ee maalgashi. Haddaba heshiiska Turkiga uu ku sahminayo, kuna soo sarayo qayb ka mida shidaalka badda ee Soomaaliya waa mid albaabada u furi kara soo jiidashada shirkado iyo dowlado waawayn oo ku dhiirada maalgashiga Soomaaliya, gaar ahaan shidaalka.

Marka la eego heshiiska cusub ee dhexmaray Soomaaliya iyo Turkiga ee ku saabsan sahaminta iyo soo saarista shidaalka badaha Soomaaliya, wuxuu noqon karaa dariiq u furma Soomaaliya si loo helo dalal kale iyo shirkado caalami ah oo danaynaya in ay maalgashi ka sameeyaan Soomaaliya, gaar ahaan shidaalka. Saddexda ceel shidaal ee Soomaaliya u xirtay Turkida ayaa ka mid ah in ka badan 200 ceel oo shidaal oo Soomaaliya ku yaala. Haddii heshiiska Turkiga uu noqdo mid guuleysta, lagana dhaxlo wax-soo-saar la taaban karo oo shidaal ah, waxay u badantahay in shirkado kale oo waawayn oo caalami ah saf u soo galaan sida TotalEnergies, ExxonMobil ama ENI oo ay si dhab ah diyaar ugu noqdaan in ay maalgashtaan shidaal soo saaridda Soomaaliya. Sidoo kale, dowlado ayaa laga yaabaa inay dan ka yeeshaan ka faa'iidaysiga kheyraadka Soomaaliyeed, taasoo kor u qaadi karta dhaqaalaha dalka haddii si daahfuran oo sharciyeysan loo maareeyo.

Haddaba, Soomaaliya, iyada oo ka duulaysa fursaddaan, waxay daw u leedahay in ay xilliga bilawga ah ay gasho heshiisyo maalgashi oo ay dhulka is dhigto ama ka tanaasusho shuruudaha qaar si ay usoo jiidato maalgashi caalami ah oo xilligaan maalgeliyaal badan oo shishiyee u arkaan mid aan lagu degdegi karin xaaladaha amni iyo siyaasaded ee dalka ka jira awdgood.

# DAKHLI ABUUR

Marka shirkadda Turkida ay si buuxda u ceshato kharashaadka kaga baxaya sahaminta iyo soosaarka shidaalka oo soo bixintiisa la dhameeyo iyadoo u qaadanaysa 90% waxsoosaarka ceelasha ay diyaariso, waxa

haray ee la soo saaro oo loo yaqaan "faa'iidada shidaalka" (Profit Petroleum) si wadaag ah ay u qeybsanayaan Soomaaliya iyo shirkadda waxay dakhli wayn u soo xeraynaysa dowladda Soomaaliya. Waxaa intaas dheer, Soomaaliya waxa ay heli doontaa illaa 5% gunno ah laga bilaabo maalinta ugu horreysa ee waxsoosaarka iyadoo wali lagu jiro marxaladda kharash-ceshiga (cost petroleum).

# XOOJINTA XIRIIRKA ISKAASHI EE TURKIGA IYO SOOMAALIYA

Turkigu wuxuu Soomaaliya la leeyahay xiriir wayn oo iskaashi oo dhinaco badan taabanaya sida mid ciidan, mid dhaqaale iyo mid siyaasadeed. Heshiiska shidaal qodistuna wuxuu fursad siinayaa sii xoojinta iskaashiga labada dal, gaar ahaan midka ciidanka iyo amniga xilli reer Galbeedku ay u muuqdaan inay ka daaleen baqti afuufka dowladnimada Soomaaliya oo aan samayn horumarkii laga filayay dhanka amniga, siyaasadda iyo dhaqaalaha. Waxa kale oo heshiiska shidaalku ka tarjumayaa fulinta heshiiskii isfahanka ee labda dal kala saxiideen Febaraayo 2024-kii kaas oo lagu qeexay iskashi dhanka difaaca iyo cidanka ah iyo in Turkidu ay helaan mudnaanta maalgashiga shidaalka iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah. Taas bedelkeed, isfaahnkaas waxaa ku xusan in Turkiga uu ilaaliyo badda Soomaaliya oo baylah u noqotay ku shubista qashinka ka soo hara warshadaha iyo jarriifka khayraadka badeed iyo in Turkigu ay dhisaan ciidan badeed ugu damayn awood u yeesha ilaalinta badda Soomaaliya.

Dabcan arrintaan kama dhigna in Soomaaliya ay Turkigu khayraadkeeda bililiqaystaan ee waa dood ku dhisan in heshiiska shidaalku fure u noqdo iskaashi ballaaran oo labada dal dhexmara oo ku dhisan "adna faa'iid, ana aan kaa faa'iido" maadaama aanay Turkiga laftigooda ahayn jimciyad samafal oo dano ay ka leyihiin Soomaaliya.

# CAQABADAHA

**Daahfurnaan La'aan**

Guud ahaaan heshiisyada ay galayso Dowladda Federaalka Soomaaliya oo uu ku jiro heshiiskan waxaa ku hareeraysan daahfurnaan, iyada oo mabaadiida dastuuriga ee Soomaaliya iyo shuruucda degsan ay farayaan dowladda in heshiisyada ay galayso noqdaan kuwa daahfuran. Heshiiska hadda looma soo bandhigin bulshada, lama gayn baarlamanka sida Turkigu uu sameeyay waana arrin dhibteeda leh, shaki wayna ku kala abuuraysa dowladda iyo shacabka. Soomaalidu waxay dhahdaa xalaal barqaa la qashaa oo ay ula jeedaan wixii wax tuhun ku jiro ayaa lala dhuuntaa.

Arrinta daahfurnaanta waxay keentay in dadka Soomaaliyeed badankood ay heshiiska diidaan oo u qataan mid lagu bannaysanayo khayraadkooda, waana arrin xitaa nacayb in ay ay bulshada Soomaaliyeed u qaadaan Turkiga keeni karta.

**Sharciyad kala dhiman**

Inkastoo guud ahaan ay Dowladda Federaalka Soomaaliya haysato awood sharci oo ay ku gasho heshiiska shidaalka iyo kuwa la mid ka ah sida dowladaha dhigeeda ah, haddana heshiiska waxaa ku gadaaman cilado sharci oo dhawr ah oo ka imaanaya in aanu waafaqsanayn sharciga bartoolka qaranka, gaar ahaan qodobka 10 (3) oo dhigaya in heshiisyada shidaalka maraan ansixinta baarlamanka, qodobka 14 oo dhigaya in heshiiska ay maamusho hay'adda qaran ee batroolka oo aanay muuqan in ay qayb ka ahayd iyo qodobka 8 (1) oo dalbanaya in qandaraasyada shidaalka maraan hab qandraas oo daahfuran oo tartan furan ah.

**Gorgortan hooseeya**

Inkastoo khubarada shidaalka oo ay ku jiraan kuwa Soomaaliyeed sida Injineer Cumar Kanoko ay caddeeyeen in duruufaha amni iyo siyaasadeed ee Soomaaliya ay ku jirto iyo ka caga taaglaynta shirkadaha dunida ee shidaal soo saarista Soomaaliya awgeed ay Soomaaliya ku saxantahay in ay heshiiskaan shuruudaha qaar khafiifiso, haddana waxaa

muuqata in awoodda gorgortanka (Bargaining Power) ee Soomaaliya uu ka hooseeyo midka Turkiga. Tusaale, qodobka 4.7 ee qeexaya in 90% shidaalka soo baxa ay Turkigu u qaataan kharash ka galaya hawsha sahaminta iyo soosaarista shidaalka (cost petroleum) waa mid aan ka tarjumayn baahida degdega ah ee Soomaaliya u qabto in ay markaba hesho faa'iidada shidaalka. Sida khubarada batroolka sheegeen badi heshiisyada noocaan ah waxay shirkaduhu kharash ceshiga u qaatan ugu badnaan 70%.

Qodobada kale ee muujinaya in Soomaaliya tanaasul aan loo baahanayn ka samaysay waxaa ka mid ah qodobka 10-aad oo qeexaya in haddii khilaaf yimaado taxkiimka uu ka dhacayo dalka Turkiga iyada oo xeerarka caalamiga ee garnaqsiga (taxkiimka) sida UNCITRAL ay soo jeedinayaan in goobta ay labada dhinac ee heshiisyada noocaan ah wada gala ay ku kala baxayaan haddii khilaaf yimaado noqoto goob saddexaad oo dhex dhexaad ah.

# GABAGABO

Inkastoo uu jiro mad-madow sharci iyo daldaloolo ku gadaaman heshiiska shidaalka ee ay kala saxiixdeen Soomaaliya iyo Turkiga, haddana waxaa loo arki karaa inuu yahay billow istaraatiiji ah oo u furaya dalka albaabada maalgeshiga caalamiga ah ee khayraadka dabiiciga ah. Marka la eego halista dhaqaale, farsamo iyo siyaasadeed ee Turkigu qaadayaan si loo sahamiyo loona soo saaro shidaalka, waxaa loo fahmi karaa in qodobada qaar ee heshiiska ay u muuqdaan sadbursi, balse ay qeyb ka tahay is-waafajinta khatarta iyo faa'iidada. Si kastaba, muhiimaddu waxay tahay in heshiisyada dambe ee Soomaalia ay galayso lagu saleeyo hufnaan, wadatashi qaran, iyo ilaalinta danaha dalka ee muddada fog.

**W/Q:** Saalim Siciid




**Xigashada Sawirka:** SSC-Khaatumo

DHAWEEYE
SPONSER






Xigashada Sawirka: LPI




# GEESKA AFRIKA:

## Goob Istiraatiiji ah oo Murugsan

Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire

Geeska Afrika waa gobol istiraatiiji ah oo qiime weyn u leh awoodaha waaweyn ee ka baxsan qaaradda, taasoo ku saleysan muhiimaddiisa juqraafiyeed iyo istiraatiijiyadeed. Gobolkani wuxuu isku xiraa qaaradaha Aasiya iyo Yurub iyada oo loo marayo Badda Cas, Kanaalka Suways, iyo Badda Mediterranean-ka.

Gobolku wuxuu leeyahay taariikh dheer oo ku saabsan khilaafaadka siyaasadeed, colaado ay dad badan ku dhinteeen, muranno xuduudeed, iyo khilaafaad ku saabsan qeybsiga iyo helitaanka kheyraadka sida muranka ku saabsan qeybsiga biyaha Webiga Nile ee bari, kaas oo u dhexeeya Masar, Itoobiya, iyo Suudaan. Caafimaadka bulshada, siyaasadda, iyo dhaqaalaha gobolka waxa sii murjiyey saameynta isbeddelka cimilada, oo ay ka mid yihiin abaaraha iyo fatahaadaha soo noqnoqda.

Gobolku wuxuu hoy u yahay dalal muhiim ah sida Soomaaliya, Itoobiya, Ereteriya, Jabuuti, Suudaan, Koonfurta Suudaan, iyo Kenya, kuwaasoo door weyn ku leh arrimaha siyaasadda, amniga, iyo dhaqaalaha gobolka. Dalka Uganda ayaa isna ku milan duruufaha amni ee ka jira gobolka oo si dadban uga tirsan. Loolanka ka jira gobolku wuxuu saameyn ballaaran ku yeeshay xasilloonida iyo horumarka mandaqadda.

Maqaalkani wuxuu gorfaynayaa sababaha loolanka awoodaha, xasaradaha ka jira iyo danaha shisheeye, iyo sida lagu heli karo gobol xasilloon oo awood u leh maaraynta danaha shisheeye ee isdiidan.

## GOBOL ISTARAATIIJI AH, DIHIN OO NUGUL

Geeska Afrika wuxuu ka mid yahay gobollada juqraafi ahaan iyo istiraatiijiyad ahaan ugu saameynta badan caalamka. Waa gobol xuduud la leh Marinka Baabul-Mandab, oo ah marin-badeed istiraatiiji ah oo ay ku dhowaad 12% ganacsiga caalamiga ah uu maro sanadkii (The Economist, 2025), iskuna xira biyaha Gacanka Cadmeed, Badda Cas iyo Kannaalka Suweys, dhanka kalena u furan Badweynta Hindiya, taasoo ka dhigaysa goob leh saamayn siyaasadeed, dhaqaale iyo mid amni.

Dhanka kale, waa gobol dihin oo hodan ku ah kheyraadka dabiiciga ah, sida macdanta, saliidda, gaaska dabiiciga ah, dhul beereed ballaaran, xoolaha iyo kalluunka, kuwaasoo aan weli si buuxda looga faa'iidaysan, waana mid ka mid ah sababaha ay quwadaha caalamka ugu loolamayaan.

Sidoo kale, Gobolka Geeska Africa waxaa ka jira is aaminaad la'aan iyo colaado ka shidaal qaadanaaya taariikh fac weyn, iyo hoggaamiyaal siyaasadeed oo ku caan baxay maamul xumo, aragti gaaban iyo keli-talisnimo. Waa gobol la il daran xasillooni-darro siyaasadeed, taasoo ay sababaan dagaallo sokeeye, khilaafaadyo qowmiyadeed, kuwo qabiil, caqabado la xiriira dowlad dhiska, argagixiso iyo muranno xuduudeed oo aan si rasmi ah xal looga gaarin. Caqabadahaas waxay gobolka ka dhigeen mid u nugul faragelinta shisheeye, iyada oo awoodaha ku hardamaaya ay mararka qaar ka faa'iidaystaan xaaladda is-mariwaaga ah ee gudaha dalalka gobolka ka jira, si ay danahooda u meelmariyaan.

## COLAADO ALOOSAN IYO DANO ISDIIDAN

"Arligaa la kala boobayaa, nin u itaal roone" Anwaan Faarax Nuur "Carab".

Geeska Afrika waxa uu la daalaadhacayaa xasarado badan oo isugu jira colaado sokeeye oo daba dheeraaday, hawlgallo badan oo caalami ah oo nabad ilaalin (Dias, 2023). Dagaallada iyo khilaafaadka gobolku waa lakabyo is dulsaaran, oo ka shidaal qaata sooyaal taariikheed oo xanuun badan (Brenner, 2024). Xasaradaha taagan ayaa saameeyay dalal badan oo gobolka ah.

### Itoobiya

Itoobiya waxay la daalaa dhacaysaa xasarado badan oo siyaasadeed iyo kuwo amni oo gudeheeda ka jira. Waxaa ugu weyn dagaalkii Tigray ee qarxay (2020-2022) oo weli saamayntiisa laga dareemaayo dalkaas. Sidoo kale, waxaa weli taagan colaadaha gobolka Amxaarada iyo Oromada, waxaana sii dheer isku dhacyada Canfarta iyo Soomaalida ee soo laalaabta, dhammanna waxa ay caqabad ku yihiin xasilloonida dalkaa iyo gobolka guud ahaan.

Dhanka kale, Itoobiya badda qaybna kuma laha, hase ahaatee waxay leedahay damac marin badeed oo ay ganacsi iyo dagaalba u adeegsan karto. Taasi waxay dhalisay iska hor imaadyo siyaasadeed oo waaweyn, sida khilaafkii diblomaasiyadeed ee Soomaaliya iyo Itoobiya ee ka dhashay is-afgaradkii ay Itoobiya la gashay Somaliland (Maamul Gooni Goosad ah) ee Janaayo 2024-kii oo sheegayay in ay hesho 20 Km oo ka mid ah badda Soomaaliya. Is-afgaradkaasi sidoo kale waxaa ka dhashay isbahaysiga Masar, Soomaaliya, iyo Eriteeriya oo loo asaasay ka hortagga damaca Itoobiya ee la xiriira helitaanka marin badeed gaarsiisan biyaha Badda Cas.

Damaca Itoobiya sidoo kale waxa uu dareen weyn geliyay dalka Eriteeriya. Xiisadda u dhaxeysa Itoobiya iyo Eriteeriya ayaa sii kordhaysa, iyadoo laga cabsi qabo dagaal baahsan inuu qarxo. Gobolka Tigray oo ah goob xasaasi ah ayaa hurin kara colaad ballaaran oo labada dal u dhexeysa, taasoo ay weheliso damaca Itoobiya ee ah inay gaaraan biyaha Badda Cas (Čok, 2024).

## Suudaan

Dalka Suudaan, waxaa ka qarxay 15 April 2023-kii dagaal u dhexeeya Dowladda Suudaan iyo maleeshiyaadka hubeysan ee Janjaweed, oo hadda loo yaqaan Ciidamada Taageerada Degdega ah (RSF). Colaadda ka socota Suudaan ma aha dagaal sokeeye oo u dhexeeya qaybo kala duwan oo bulshada ah, mana aha oo keliya loollan awoodeed u dhexeeya ciidamo hubeysan oo iska soo horjeeda. Balse, waa dagaal wakiilo adeegsi (Proxy War) iyadoo faragelinta dibadda ay door weyn ka ciyaarayso sii hurinta colaadda. Dalka Imaaraadka Carabta (UAE) ayaa lagu eedeeyay inuu si xoog leh u taageerayo maleeshiyada RSF (Sudan Facts, 2025), ilaa heer Dawladda Suudaan ay dacwad u gudbisay Maxkamadda Denbiyada Adduunka, taasoo weli dhageysigeedu socdo. Siyaasadda arrimaha debedda ee Imaaraadka Carabta (UAE) ee gobolku waa mid murugsan oo ay ku taageerto jilayaal aan dawli ahayn, sidoo kale waxay caqabad ku tahay hannaanka diblomaasiyadeed ee caalamku isticmaalo, badanaana waxa ay ka hor imaanaysa xeerarka caalamiga ah (The Economist, 2025).

Suudaan waxay noqotay goob loollan adag oo u dhexeeya quwado shisheeye oo leh dano istiraatiiji ah oo isdiidan; Turkiga iyo Qatar waxay hiigsanayaan saameyn dhaqaale iyagoo maalgelinaya dekedaha, Imaaraadka Carabtu wuxuu si qoto dheer ugu lug leeyahay dagaalka, isagoo u heelan dano la xiriira macdanta iyo sidii xulafadiisu ula wareegi lahaayeen talada Suudaan, Ruushku wuxuu si adag u doonayaa saldhig ciidan oo danihiisa gobolka ku waardiyeysto, halka Iiraan ay waddo dedaal ay kula tartamayso saamaynta Sucuudiga (The Economist, 2024). Masar iyo Sucuudiga ayaa si weyn uga shaqeynaya sidii xasilloonida Suudaan loo soo celin lahaa, iyagoo danaynaaya xasilloonida marinada ganacsiga Badda Cas oo ay ku yaaliin Kannaalka Suweys iyo degadaha muhiimka ah ee Boqortooyada Sucuudiga.

## Koonfur Suudaan

Xasillooni-darrada ka jirta dalka Koonfur Suudaan waa qayb ka mid ah colaadaha siyaasadeed iyo amni ee ka taagan gobolka Geeska Afrika. Khilaafka u dhexeeya Madaxweynaha Salva Kiir iyo ku xigeenkiisa Riek Machar waxa uu qayb ka yahay xiisadaha waaweyn ee saameynaya xasilloonida gobolka, iyada oo dagaallo culus ay ka socdaan qaybo ka mid ah dalkaa. Uganda ayaa ciidamo u dirtay si ay u taageerto Salva Kiir, taasoo sii hurisay xaaladda. Dhanka kale, Masar iyo Itoobiya ayaa waxaa ka dhexeeya tartan lagu qaabaynaayo mustaqbalka dalkaas. Koonfurta Suudaan waa dal hodon ku ah kheyraadka dabiiciga ah, gaar ahaan shidaalka, taasoo ka dhigaysa in uu noqdo goob uu loolan xooggan ka jiro, awoodo badan oo kala dano ahna ay isha ku wada hayaan.

## Soomaaliya

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay dalalka ugu nugul Geeska Afrika, uguna hardan badan markii la eego danaha is-diidan ee awoodaha dibadda. Waa dal ku yaala goob istaraatiiji ah, islamarkaana ay ka jiraan khilaaf siyaasadeed oo ragaadiyey, taasoo saameyn ku yeelatay xasilloonida siyaasadeed iyo wada-shaqeynta heerarka kala duwan ee dowladda. Khilaafku waxa uu salka ku hayaa arrimo ay ka mid yihiin dastuurka, maamulka kheyraadka, iyo habka doorashooyinka dalka, taasoo mararka qaar keenta is-mariwaa siyaasadeed iyo muran sharciyeed.

Dhanka amniga, kooxaha argagixisada sida Al-Shabaab iyo Daacish ayaa weli khatar ku ah xasilloonida dalka, iyagoo lagula jiro dagaal joogta ah. Waxaa sii dheer hardanka awoodaha gobolka iyo dunida. Imaaraadka Carabtu (UAE) waxay horumarisay deked kontiiner (Berbera) oo $400 milyan ah, iyadoo Puntland ka samaysatay saldhigyo milateri (The Economist, 2025), lana saxiixatay heshiisyo lagu horumarinayo dekadda Bosaaaso. Turkigu wuxuu taageeraa Dowladda Federaalka Soomaaliya, isaga oo saldhig ciidan ku leh Muqdisho. Waxa uu la saxiixday Dowladda Soomaaliya heshiis shidaal oo muran weyn dhaliyey oo faa'iidada u badan loo saxiixay dalka Turkey, waxaa intaa dheer in Turkidu qorshaynayaan in ay Soomaaliya ka samaystaan xarun laga diro Dayax-Gacmeed.

Maraykanka ayaa isna waxa uu qorsheynayaa inuu dhisto saldhigyo ciidan oo heshiisyo is-afgrad oo aan la soo bandhigin la galay Dowladda Soomaaliya. Dhanka kale, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay u fidisay Maraykanka hawlgalinta dekedaha Berbera iyo Boosaaso, iyadoo ugu baaqday shirkadaha shidaalka ee Mareekanka inay ka hawlgalaan SSC-Khaatumo. Maamulka Trump waxa uu wadaa siyaasad ku aaddan Afrika oo diiradda saaraysa tartan xooggan oo uu la galo Shiinaha dhanka ganacsiga, maalgashiga kaabayaasha dhaqaalaha, iyo xiriirka diblomaasiyadeed ee Afrika. Waxay si gaar ah isha ugu hayaan gobolka Geeska Afrika, maadaama uu xiriir dhow la leeyahay danahooda Bariga Dhexe, isla markaana ay suurtagal tahay in danahooda iyo kuwa Imaaraadka Carabta (UAE) ay is waafaqaan (Foreign Affairs, 2024)

## MUSTAQBALKA GEESKA AFRIKA

Waxaan shaki ku jirin in xasilloonidu ay muhiim u tahay horumarka bulshada, dhaqaalaha, iyo siyaasadda ee Geeska Afrika. Si taa loo gaaro waa in la helaa isbeddello ku yimaadda qaab-dhismeedyada siyaasadeed iyo hannaanka dawladnimo. Geeska Afrika wuxuu u baahan yahay hannaan dhammaystiran oo istiraatiijiyad ku salaysan, kaas oo saldhig u noqonaya dhismaha dowladnimo loo dhan yahay oo waarta. Istiraatiijiyaddan waa in ay ku tiirsanaataa wadahadallo joogto ah oo ku salaysan is-faham qoto dheer, iskaashi lagu kalsoonaan karo, iyo xoojinta xasilloonida siyaasadeed iyo horumarka dhaqaale ee gobolka.

Danaha is-diidan ee awoodaha caalamku waa jiri doonaan, hase yeeshee, xasillooni siyaasadeed iyo horumar waara waxaa lagu gaari karaa iyada oo la hirgeliyo maamul wanaag, daah-furnaan, iyo hannaan nabadayn oo waxtar leh. Dawladaha Geeska Afrika waa in ay xoogga saaraan iskaashi lagu soo afjaro colaadaha gudaha iyo kuwa ka dhex jira dowladaha gobolka. Sidoo kale, halganka wadajirka ah ee ka dhanka ah argagixisada caalamiga ah waa in la xoojiyo, si loo gaaro gobol xasiloon oo kaalin muuqata ku leh horumarka caalamiga ah.

## TIXRAAC


1. Brenner, A. (2024). The prolonging Abyssinian Crisis. Contemporary conflict politics of the Ethiopian government.
2. Čok, C. (2024, May 29). Back from the brink: Avoiding a new Ethiopia-Eritrea war. European Council on Foreign Relations. https://ecfr.eu/article/back-from-the-brink-avoiding-a-new-ethiopia-eritrea-war.
3. The Economist: The UAE preaches unity at home but pursues division abroad, April 2025.
4. The Economist: A new smash and grab for Red Sea ports, April 2025.
5. Foreign Affairs: A Trumpian Policy for Africa, December 2024
6. Dias, A. M. (2023). State and societal challenges in the Horn of Africa. East African University Press.
7. MOFAS, 2025. UAE's Proxy War in Sudan: Exploiting Natural Resources and Committing Genocide


**W/Q:** Xildh. Cabdullaahi Faarax Mire



Xigashada Sawirka: Wasaaradda Duulimaadka PL

# HIJRADA PUNTLAND:

## Halis La hilmaansanyahay

Faarax Cusmaan

Kadib burburkii dowladnimada Soomaaliya 1991-dii, gobolada waqooyi-bari ee Soomaaliya oo haatan loo yaqaan Puntland waxay kamid ahaayeen gobolada ugu nabdoon ee dalka, iyadoo dhismihii Puntland sanadkii 1998-dii kadib ay ka hirgaleen xasilooni iyo kala dambayn keentay in dad badan oo Soomaaliyeed ay yimaadaan si ay nolol cusub uga samaystaan.
Inkasta oo aysan jirin xogtada tirada rasmiga ah, haddana sanadihii u dambeeyay Puntland waxa ay la kulantay guuritaan dadweyne oo joogto ah, taasoo si muuqata looga dareemay magaalooyinka waaweyn, gaar ahaan dhinaca dhaqaalaha iyo adeegyada bulshada.
Faalladan kooban, waxaan diiradda ku saari doonaa sababaha kala duwan ee keenay guuritaanka joogtada ah ee Puntland laga tagayo, iyo xalalka muhiimka ah ee arrintan lagu wajihi karo.

## MAXAA SABABAY GUURITAANKA?

Tan iyo markii magaalada Muqdisho laga saaray kooxda Al-Shabaab sanadkii 2011-kii, lagana baxay kumeel-gaarnimadii, waxaa si degdeg ah dib ugu soo laabtay adeegyada bulshada iyo dhaqdhaqaaqii ganacsi ee caasimadda. Taasi waxay abuurtay fursado badan oo shaqo iyo nolol ah, iyadoo dad badan oo muruqmaal iyo xirfadlayaal ahaa kuwaasoo horey uga shaqayn jiray Puntland ay u guuraan Muqdisho si ay uga faa'iidaystaan fursadaha yaala caasimada dalka.

Dhanka kale, tan iyo 2008-dii, magaalooyinka Galkacyo iyo Boosaaso waxaa ka bilowday dilal qorsheysan oo si gaar ah loogu beegsanayay ganacsato, waxgarad, iyo dadka saameynta ku dhex leh bulshada. Xaaladdan amni-darro waxay sababtay cabsi ballaaran, taasoo keentay in dad kala duwan gaar ahaana ganacsato iyo aqoonyahanno ay isaga cararaan Puntland. Sidoo kale, colaadaha qabiilka iyo aanooyinka soo noqnoqda ayaa iyana qeyb weyn ku leh.

Dhanka Garoowe, caasimadda Puntland, ayaa sanadihii u dambeeyay wajahaysay hoos u dhac ku yimid fursadaha shaqo, taasoo sababtay in tiro badan oo dhallinyaro waxbartay iyo khubaro xirfadlayaal ah ay u wareegaan Muqdisho, si ay uga faa'iideystaan fursadaha shaqo iyo horumar ee halkaas ka jira.

Sanadihii u dambeeyay, qoysas badan ayaa ka haajiray magaalooyinka waaweyn ee Puntland, kuwaas oo intooda badan u guuray dalalka deriska la ah Soomaaliya sida Kenya, Itoobiya, iyo Uganda, iyo sidoo kale waddamo kale sida Turkiga iyo Masar. Qoysaskan oo badankoodu ka tirsanaa dadka dakhligoodu dhexdhexaadka yahay, ayaa sheegay in ay doorteen inay u guuraan meelo ay carruurtoodu ka heli karaan adeegyo waxbarasho iyo caafimaad oo tayo leh, maadaama adeegyadan Puntland ka jira ay aad u liitaan.

Intaas waxaa dheer, waxaa sanadkan dib u bilaabmay tirada dhallinyarada reer Puntland ee tahriibaysa gaar ahaan kuwa isku dayaya inay gaaraan Yurub iyagoo sii maraya badda Mediterranean-ka. Tahriibkan oo ay riixayaan arrimo is biirsaday sida fursado shaqo gudaha oo aad xaddidan, jihayn la'aanta dhallinyarada sida in loo abuuro barnaamijyo lagu shaqo gelinayo, iyo maamul-xumada iyo musuqmaasuqa baahsan ee ka jira Puntland oo ah caqabad weyn oo hortaagan abuurista shaqooyin dhallinyarada.

Sidoo kale, khilaafka siyaasadeed ee joogtada ah oo aan weli xal laga gaarin ee u dhexeeya Dowlad Goboleedka Puntland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si weyn u saameeyay deegaannada Puntland. Khilaafkan oo arrimo kala duwan salga ku haya sida dastuurka, awood qaybsiga, iyo maammulidda khayraadka iyo mashaariicda iyo mararka qaar dano shakhsi ah, wuxuu horseeday in ay Puntland si xiriir ah uga maqnaato go'aan gaarista qorshayaasha dalka ee muhiimka ah, taasoo keentay in mashaariic horumarineed iyo bini'aadantinimo oo ay maalgeliyaan deeq bixiyeyaasha caalamiga ah ay hakad galaan ama gabi ahaanba aan Puntland laga hirgelin, taasoo si weyn u saamaysay fursadaha shaqo, dhaqaalaha, iyo adeegyada aasaasiga ah ee bulshada.

Waxaa tusaale u ah in Puntland ka hartay Qorshaha Horumarinta Qaranka (National Development Plan) ee sanadaha 2025–2029, taas oo micnaheedu yahay in ay yartahay fursadda ay Puntland ka heli karto mashaariicda horumarineed ee la qorsheeyay shanta sano ee soo socota—haddii aan dib u eegis lagu sameyn. Sidoo kale, xogta sahaminta shidaalka Soomaaliya oo muhiim u ah maalgashiga iyo horumarka dhaqaale, kama dhex muuqato deegaannada Puntland, halka Soomaaliland oo si rasmi ah u sheegata goonigoosad ay gudbisato xogteeda si aysan uga harin fursadaha mashaariicda horumarineed iyo sahminta shidaalka.

Hoos u dhac bulsho iyo dhaqaale oo aad u xooggan ayaa ku socda Puntland, waxaana si deg-deg ah loogu baahanyahay in hoggaanka sare ee Puntland si xilkasnimo leh ay u wajahaan wax ka qabashada xaaladdaan.

## TALO-SOOJEEDIN

- Si looga hortago guuritaanka baahsan ee ka socda Puntland loona abuuro mustaqbal dhaqaale oo xasilloon, waxaa lama huraan ah in reer Puntland – dowlad iyo shacab – ay si wadajir ah isugu yimaadaan talo guud oo masiiri ah. Talo wadaaggaan waa inay saldhig u yihiin xaqiiqooyinka dhabta ah ee deegaanku wajahayo, iyadoo madaxweynaha talada haya ee Siciid Cabdullaahi Deni laga rabo inuu si geesinimo leh u wajaho xaaladda, meel iska dhigo siyaasadda go'doonka ah ee ka fog waaqica dhabta ah.

- Waxaa kale oo muhiim ah in Puntland ay si degdeg ah u jihayso aragtideeda iyo qorshaheeda ku aaddan shidaalka Soomaaliya, iyadoo mashaariicda horumarineed iyo deeqaha caalamiga ah ay hadda u muuqdaan in ay sii gabaabsi yihiin, waxa kaliya ee beddel noqon kara waa in Soomaaliya shidaal la soo baxdo. Haddii Puntland aysan kaalin muuqata ku yeelan qorshaha shidaalka—xogtiisa, sahankiisa, iyo istaraatijiyadiisa—waxay lumin kartaa fursad dahabi ah, waxaana imaan karta in deegnaada Puntland dhaqaale ahaan go'doomaan, ka haraan gobolada kale lagana haajiro.

- Puntland waxay la dhibaatoonaysaa matalaadda iyo siyaasaddeeda heer Federaal, iyadoo madaxdii isaga dambaysay Puntland ay u muuqdaan in aysan ka lahayn aragti siyaasadeed oo ku dhisan maslaxdda reer Puntland. Arrintan waxay keentay in laga haro go'aanno masiiri ah oo ay adkaanayso in dib loo saxo iyo fursado horumarineed. Haddii ay sidaas ku sii socoto, waxay gaaraysa marxalad aan laga soo kaban karin. Sidaa darteed, Puntland waa inay si dhab ah u qaabayso siyaasadeeda iyadoo lagu salaynayo danta dadka iyo deegaannada reer Puntland.


**W/Q:** Faarax Cusmaan



**Xigashada Sawirka:** Puntland State House

# WAA KUMA HOGGAAMIYAHA SIYAASADEED EE GUULAYSTAA?

Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: Istockphoto

Waa su'aal mudan in lays waydiiyo; maadaama Soomaaliya aysan nasiib u yeelan inta badan hoggaamiyayaal siyaasadeed oo la oran waa guulaysteen, kuwaasoo bulshadooda ku haga yoolka la higsanayo, iskaba-daayoo waxaa hoggaanka Soomaalida hareeyey lagasoo bilaabo markii 60-kii xornimada la qaatay ilaa maanta musuqmaasuq, isdaba-maryayn, qabyaalad, keligi talisnimo iyo laaluush lagu bixiyo gaaridda xukunka.

Haddaba; qormadaan kooban waxaan ku iftiiminaynaa: hoggaamiyuhu wuxuu yahay, sifooyinka hoggaamiyaha guulaysta laga raabo, iyo noocyada hoggaamiyayaashu u qaybsamaan.

## A/ QEEXIDDA HOGGAAMIYE:

Hoggaamiyuhu waa qofka bulshada abaabuli kara, rabitaan ka kasban kara, si kalsooni ku jirtana ugu wacyi gelin kara si goor iyo ayaan ay ula shaqeeyaan, wadajirna ugu gaaraan himiladooda.

Saddex arrimood oo muhiim u ah hoggaaminta hoggaamiyaha fiican:

1. Waa inuu dhisan karo hawl fuliyaal adag (koox shaqo) oo la shaqaysa tayana leh.
2. Waa inuu si adag u dhisi karaa kartida hawl wadeenna la shaqaynaya.
3. Waa inuu ku dadaali karaa gaarista aragtida fog, himilada iyo hadafka u degsan ee u muddaysan (Hoggaaminta suubban, Asha Geelle 2010).

Mabaadi'da Hoggaaminta waxaa ka mid ah kan uu tilmaamay Stepen Covey:

*"Haddii aad qofka siiso xabbad kalluun ah, waxaad quudisay hal maalin, laakiin haddii aad siiso qalabka lagu jillaabto kalluunka waxaad quudisay inta uu nool yahay, balse haddii aad barto sida loo samaysto qalabka lagu jillaabto, waxaad siisay nolol cusub ee cunno keliya ma aadan siin" .( صناعة القائد 2010)*

Hoggaaminta suubbani waa ummadda in loo dhaqaajiyo xaqiijinta hadafka iyo ujeeddooyinka la degsaday, laguna tirtirsiinyo masuuliyadda cid walba saaran; Saxaabigii weynaa ee Cabdullaahi Ibn Cumar wuxuu ka weriyey Rasuulka (SCW) inuu yiri:

*Dhammaantiin waxbaa laydin raaciyey, waxaadna masuul ka tihiin wixii laydin raaciyey; Amiirku waxaa la raaciyey ummaddiisa, iyaga ayuuna masuul ka yahay, haweenta waxaa la raaciyey guriga ninkeeda, isaga ayayna masuul ka tahay, addoonka waxaa la raaciyey maalka sayidkiisa, isaga ayuuna masuul ka yahay.*

Xadiiskaas qiimaha badani wuxuu noo tilmaamayaa in cid walbaa oo bulshada ka mid ahi ay masuul ka tahay waxa la raaciyey ee loo diray inay ilaaliso oo daryeesho, lagulana xisaabtamayo masuuliyaddaas, laga soo bilaabo qofka ummadda madaxda u ah ilaa lasoo gaaro wiilka shaqaalaha ah ee xaafadda u adeegaya.

Hoggaamiyaasha siyaasaddu waa madaxda dalka garwadeenka u ah oo ku hagta himilooyinka la higsanayo, ama ha noqdaan madaxda dawladda Federaalka, amaba madaxda dawlad-goboleedyadaba, waa kuwa u dhaartay inay Soomaaliya gaarsiinayaan horumar iyo barwaaqo, burburka iyo kala-haadkana ka saarayaan; balse waxaa noo muuqanaya maanta oo aan bartamaha uga jirno sanadka 2025 inaysan muuqan ififaale ay bulshada Soomaalidu ku naalloon karaan, iskaba-daayoo waxaad mooddaa in dib loo guranayo, xaaladda dalkuna ay kasii darayso, rajada bulshadu ay ku qabto hoggaamiyaashooda siyaasadeedna ay soo yaraanayso maalinba maalinta ka dambaysa (Halgan iyo Hagardaamo, 2012).

# B – SIFOOYINKA HOGGAAMIYAYAASHA SIYAASADEED:

Dr. Xassan Cali Mire (AHN) ayaa daraasad uu halku-dheggeedu ahaa "***Can Somalia be saved?"*** ama ***"Soomaaliya ma la badbaadin karaa?";*** taasoo uu ugu talagalay shirweynihii Carta, 2000; ku tilmaamay shan sifo oo ay lagama maarmaan tahay inuu yeesho hoggaamiyaha siyaasadda dal kasta, la'aantoodna aan laga yaabin inuu xilkiisa si wanaagsan u guto; shantaas sifo (calaamado) waxay kala yihiin:

1. Waddaninimo: hoggaamiyaha siyaasaddu waa inuu yahay nin lagu yaqaanno waddan jacayl, leeyahayna sooyaal caddaynaya waxa uu dalkiisa usoo qabtay iyo kaalintuu ugu jiray.
2. Tacliin aan ka yarayn heer Jaamacaddeed: aqoontu waa furaha horumarka, suurtagalna maaha in hoggaamiyuhu dalkiisa horumar gaarsiiyo haddii uusan aqoonteeda lahayn.
3. Hufnaan ama xuma-ka-dhawrsi (integrity): qodobkaani waa meesha inta badan hoggaamiyayaasha Soomaalidu ay ku fashilmaan, dalkeennana ka dhigay calaamadda musuqmaasuqa iyo wax-is-dabamarinta.
4. Karti badan: qofka hoggaaminaya dal Soomaaliya oo kale ah, waa inuu yahay qof karti badan, waqti badan shaqayn kara, culaysyada badan ee horyaallana karti iyo hufnaan ku wajihi kara.
5. Bisayl siyaasadeed: waa in hoggaamiyuhu leeyahay khibrad ku filan oo u oggolaanaysa inuu noqdo qof awood isku-keenidda dal iyo dad kala irdhoobay oo u baahan in laysku soo dumo (Dal dad waayay iyo Duni damiir beeshay, Dr. Afrax)

Waxay daraasaddani carrabka ku adkaynaysaa, aniguna aan ku waafaqsannahay, in sababta dalka Soomaaliya burburisay, lana dhismi la'yahay ay tahay hoggaan xumo. Waa jiraan sababo kale oo qayb ka ah burburka oo ay ka mid tahay faragelinta shisheeyaha oo joogtada ah; balse laf-dhabarka dhibka dalkeennu waa hoggaanka. `

# C – NOOCYADA HOGGAAMIYAYAASHA:

Dr. Maxamed Afrax ayaa buuggiisa "Dal dad waayay iyo duni damiir beeshay" ku sheegay in dadku u kala baxo garwadeen (hoggaamiye) iyo la-wadeen, wuxuuna yiri: "Garwadeenku waa inta wax hoggaamisa, la-wadeenkuna waa dadka caadiga ah ee la hoggaamiyo, waa shicib-weynaha".

Garwadeenku wuxuu la micno yahay erayga "elite" ee afka Ingiriiska, waxaana loo qaybiyaa saddex qolo:

1. Garwadeenka siyaasadda (political leadership)
2. Garwadeenka fekerka (Intellectual leadership)
3. Garwadeenka dhaqaalaha (economic elite)

Inta badan dalka horumaray saddexdaan qolo iskuma qasna. Qolo waliba waxay leedahay mehered iskeed u taagan iyo meel cad oo loogu soo hagaago.

Hase yeeshee; dalalka dib u dhacsan ee loo yaqaan waddamada soo koraya ama dunida saddexaad, Soomaaliyana ay ka mid tahay, saddexda qolo ee garwadeenka ahi xuduud kala qeexan maleh, mana kala soocna.


Sida badan garwadeenka siyaasadda ayaa noqda wax walba; iyaga ayaa dhaqaalaha afduuba maadaama ay noqdaan hantiilayaal waaweyn, hantiilayaasha kalena iyaga ayay ka haybaystaan. Awoodda siyaasadeed ayay ku uruursadaan hanti aan xalaal ahayn. Sidoo kale ayaga ayaa saamaynta ugu xooggan ku yeesha fekerka bulsha-weynta. Waa halka murtida carbeed ka tiraahdo "annaas calaa diini muluukihim" (dadku waxay qaataan diinta boqorradooda).

Wadar ahaan; garwadeenka ayaa ka masuul ah burburinta Soomaaliya iyo bi'inta magacii Soomaalida. La-wadeenka (shicibka) inkastoo dabka la galiyey, dariiqa xun ee la mariyeyna ka leexan kari waayey, haddana eed weyn lama saari karo oo ayagu waa dulmanayaan aan iska difaaci karin dulmiga iyo hagarta garwadeenka.

Weli Soomaalidu kuma guulaysan garwadeen siyaasadeed oo dalka u horseeda horumar iyo baraare, siyaasad toosanna ku hoggaamiya, balse taas baddalkeeda waa lagu danaystaaye looma daneeyo, waxayna hagardaamadaas uga bixi karaan iyagoo awooddooda Alle tuso, doorka ku beeganna qaata, hoggaankana la xisaabtama oo xaqqooda cod dheer ku sheegta **(Dal dad waayay iyo Duni damiir beeshay Dr. Afrax).**

Allow dalka noo hagaaji,

**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax



**Xigashada Sawirka:** Talefishibka Qaranka Soomaaliyeed



**Xigashada Sawirka:** GITTY

# AQOONSIGA SSC-KHAATUMO:

## MAXAA PUNTLAND LA GUDBOON?

Sakariye Axmed Maxamed (Rabiica)



Xigashada Sawirka: SSC-Khaatumo

25-kii Agoosto 2023-kii, kadib toddobo bilood oo dagaal culus oo sababay khasaare naf iyo maalba leh, SSC-Khaatumo ayaa ku guuleysatay in ay ciidamada maamulka Somaliland ka saarto gobolka Sool, kaasoo ay Somaliland maamuleysay tan iyo sannadkii 2007-dii.

Raysulwasaaraha Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) Xamse Cabdi Bare ayaa safar taariikhi ah ku tagay magaalada Laascaanood ee xarunta SSC-Khaatumo 12-kii April, 2025, waxaana war-murtiyeed soo baxay 15-kii April si rasmi ah loogu sheegay in SSC-Khaatumo loo aqoonsaday Dowlad Goboleed kamid ah kuwa ka jira dalka, oo xubin buuxda ka noqon doonta Golaha Wadatashiga Qaran (NCC).

Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo Cabdulqaadir Axmed Aw-cali ayaa si rasmi ah uga qeybgalay markii ugu horeysay Madasha Wadatshiga Qaran oo qabsoontay 6-7 bishaan May, waxaana war-murtiyeedkii ka soo baxay shirkaas in golaha NCC ay aqoonsadeen in SSC-Khaatumo ay tahay xubin kamid ah dowladaha xubnaha ka ah DFS, taasoo markale rumaysay himilada dadka reer SSC-Khaatumo ee ah in ay helaan maamul iyagu leeyihiin.

Maqaalkan waxaan si kooban ugu falanqaynayaa waxa la gudboon Puntland kadib aqoonsiga SSC-Khaatumo iyo tallaabooyinka habboon ee la qaadi karo.

**Puntland iyo Waqiiciga Siyaasadeed ee Cusub**

Tan iyo markii dhidibada loo taagay Puntland sanadkii 1998-dii, dadka gobollada Sool iyo Cayn waxay door muhiim ah ku lahaayeen dhismaha iyo horumarka Puntland, iyagoona matalaad ballaaran ku lahaa golayaasha dowladda, sida madaxweyne-kuxigeen, xildhibaanno, wasiirro, agaasimayaal, shaqaale, saraakiil iyo ciidamo. Inkastoo qaybo kamid ah gobolka in muddo ah ay gacanta ugu jireen maamulka Somaliland, haddana masuuliyiinta deegaanaas ka soo jeeda ayaa xilal ka hayay Puntland.

Kadib kacdoonkii shacabka Laascaanood ee dabayaaqadii 2022-kii, bulshada iyo maamulka Puntland waxay si buuxda oo shuruud la'aan ah u garab istaageen dadka deegaankaas, taasoo gundhig u noqotay in shacabka Sool iyo Cayn ay dib ula soo noqdaan maamulka iyo masiirka deegaanadooda.

Haddaba, marka la eego isbeddelka siyaasadeed ee ka dhacay gobolkaas, Puntland waxaa waajib ku ah in ay si masuuliyad leh uga jawaabto rabitaanka shacabka reer SSC-Khaatumo, kuwaas oo si cad u muujiyey in ay doonayaan maamul madax-bannaan oo ay iyagu dhisteen, islamarkaana qayb ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya. Madaxweynaha hadda xafiiska haya ee Puntland, Siciid Cabdullaahi Deni, ayaa dhowr jeer ku celceliyey in uu ixtiraamayo rabitaanka shacabkaas.

Puntland waxaa la gudboon in ay qabato shirweyne qaran oo si qoto dheer loogu falanqeeyo marxaladda cusub ee siyaasadeed ee ku aadan Puntland iyo SSC-Khaatumo, si loo helo aragti siyaasadeed oo bisil, ku saleysan wadatashi, mas'uuliyad iyo danta guud. Shirkan waa inuu noqdaa madal furan oo horseeda kala-guur nabdoon, loogana shaqeeyo dhisidda iskaashi miro dhal ah oo dhex mara labada dowlad-goboleed si loo xoojiyo midnimada, deganaanshaha iyo horumarka guud ee labada dhinac.

## TALOOYIN KU SOCDA PUNTLAND IYO SSC-KHAATUMO:

1. Ka shaqeynta marxaladda kala-guurka: Puntland iyo SSC-Khaatumo waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan marxaladda kala-guurka iyo arrimaha siyaasadeed iyo bulsho ee ka dhalan kara, iyagoo ka duulaya danaha guud ee labada dhinac.

2. Iskaashiga horumarka, ganacsiga, iyo ammaanka: Labada dowlad goboleed waa in ay iskaashadaan oo si wadajir ugu hawlgalaan dhinacyada horumarka, ganacsiga iyo ammaanka si loo xaqiijiyo xasilooni iyo horumar waara.

3. Aqoonsiga SSC-Khaatumo: Puntland waa in si rasmi ah u aqbasho aqoonsiga SSC-Khaatumo, iyadoo lagu saleynayo rabitaanka shacabka ee dhinaca maamulka iyo madax-bannaanida.

4. Ka fogaanshaha khilaafaadka: Mas'uuliyiinta labada dhinac waa in ay ka fogaadaan wax kasta oo keeni kara khilaaf iyo kala fogaansho dhexmara labada bulsho ee walaalaha ah, iyadoo la ilaalinayo wada noolaanshaha, walaalnimada, derisnimada, iyo midnimada.

**W/Q:** Sakariye Axmed Maxamed (Rabiica)

# SHEEKO QARAN
## (QAYBTA 2-AAD)

Cabdirashiid Maxamed Cabdi



**Xigashada Sawirka:** Wikiwand

# HALGANKII DARAAWIISHTA

Qaybsigii dhulka Soomaalida ka dib, waxaa markale bilowday halgankii gobannimo doonka Soomaaliyeed ee **Halgankii Daraawiishta** oo markaas hogaanka uu u ahaa Darwiishkii hubaysnaa ee **Sayid Maxamed Cabdulle Xassan**, kaasoo muddo dhawr iyo labaatan sannadood ah la dagaalamayay gumaystihii dalka qabsaday gaar ahaan Ingiriiska, Talyaaniga iyo Xabashida oo dagaallo kharaar dhexmareen dhamaantood.

Halgamaa Sayid Maxamed Cabdulle Xassan wuxuu ku dhashay nawaaxiga dagmada Buuhoodle, halkaas oo uu ku barbaaray kuna bartay waxbarashada Quraanka iyo kutubta diinta sida uu ku xusay **Aw-jaamac Cumar Ciise** buugiisa **"Diiwaanka Gabayda Sayidka",** wuxuuna sheegay in Sayidku 1892-dii aaday dhulka barakaysan ee Makka iyo Madiina halkaas oo uu ku maqnaa muddo saddex sanno ah oo uu diin barasho u joogay.

Sayidkii iyo Darwiishtiisiiba waxay bilaabeen abaabul ay ka hortagayaan gumaystaha dalka ku habsaday, sanadkii **1900-kii** Ingiriisku wuxuu weerar lixaad leh ku qaaday ciidanka Daraawiishta, waxaana dagaalka halkaas ka qarxay socday muddo ku dhaw 20 sano oo ay halgamayaashii Daraawiish kaga soo horjeedeen gumaystihii reer Yurub iyo Xabashida (Itoobiya), mudaddaas halgankaas socday waxaa dhacay dagaallo waa weyn oo lagu qaaday Ingiriiska Waxaana kamid ahaa Afbakayle, Beerdhiga, Jidbaale, Fardhidin, Daratoole iyo Ruuga.

Sanadkii 1919-kii dawladdii Ingiriisku waxay sideed dayuuradood ku weerarreen qalcadihii iyo talisyadii Daraawiishta ee Jiidali, Baran iyo Taleex, waxayna ahaayeen meelihii ugu horreeyay Afrika ee lagu weeraray diyaarado, taas keentay in Daraawiish ay dib ugu soo gurteen dhanka gobollada koonfureed.


Halgankii Daraawiish wuxuu ahaa kacdoon socday labaatan sanno oo gumaysi la dirir ah, doonayayna gobanimo Soomaaliyeed iyo in uu ka sifeeyo dhulka Soomaalidu shisheeyaha doolka ah, inkastoo khilaafaad gudaha dadka Soomaalida ka dhex jiray, haddana halgankaas wuxuu door muuqda ka qaatay kicinta wacyiga iyo damiirka dadka Soomaaliyeed, waxaana qayb ka noqday halgankaas abwaanno, caaqillo iyo dhamaan qaybaha Bulshada. Dadkaas waxaa kamid ahaa **Xaaji Cali Faahiye Geedi**, oo ahaa nin reer Qandala ah kana soo jeedo reer maalqabeen ah oo taageersan halganka Daraawiishta hubna ugu keenay Sayidka xaruntiisii Eyl, kadib markuu ku laabtay dagmadii Qandala wuxuu arkay daartii aabihiis oo la suray calankii gumaystihii Talyaaniga kaas oo heshiis la galay **Boqor Cismaan** iyo boqortooyadiisii, kadib **Xaaji Cali** wuxuu soo dajiyay calankii Talyaaniga halkaas oo uu ku gubay, waxayna ku tusaysaa dareenka ay dadku ka qabeen gumaystaha iyadoo hogaamiyihii Daraawiishta Sayid Maxamed Cabdulle Xassan uu dadka ku guubaabinayay tix iyo tiraaba, ugu dambayna uu ku geeryooday Iimay sanadkii 1921-dii.

**W/Q:** Cabdirashiid Maxamed Cabdi

SPONSER






**Xigashada Sawirka:** Abdiaziz siiso

# MASUULIYADDA DADWAYNAHA (1)

Maxamed Nadiif Showkaani

# ARAR

Mar haddii laga hadlaayo masuuliyad ama arrin uu ka dhalanayo qaan, ciqaab iyo masuuliyad cidi yeelanayso ama dhib la qaadanayo iyo sama lasoo jiidayo, waxaa lagama maarmaan ah in la is waydiiyo cida saartay dadka masuuliyadaas ama arinkaas ka lusha qoortooda oo ay tahay inay gudaan, maxaa yeelay arin kasta oo la saarayo dadka waa inuu yeeshaa il uu kasoo baxay oo sharci ah ama loo hayo tixgelin ah inay awood u leedahay soo saarista amaradaan oo kale.

# KALA ABLA ABLAYNTA XUKUNKA IYO WAAJIBAADKA ISLAAMKA

Ka war celinta is waydiintaasi waxay noqonaysaa inaan dul istaagno xukunka iyo suu samaysmo islaamka dhexdiisa, iyo kala abla-ablaynta qaybihiisa kala duawan.

Salka fiqiga ( ) cilmiga la yiraahdo waxaa qaybihiisa hore xeel-dheerayaashiisu kaga doodaan arima la xiriira xukunka ( ) ayagoo cadaynaya qeexidiisa iyo qaybihiisa.

Haddaba xukunka marka la joogo cilmigaan waxaa loola jeedaa xukunka sharciga waxaana lagu qeexaa inuu yahay: hadal sharciyeed la xiriira falka uu sameeyo qofka qaan qaadah ah ama waa hadalka sharciga ee wata faaiido sharciyeed .

Soo koobidaas ka dib waxaa looga kala qaybiyaa xukunka laba oo kala ah:

1. Xukun takliifiga ah ama kan la xiriira wax la dul saaray qofka qaan qaadka ah .
2. Xukunka wadciga ah ama la xiriira arin, arin shardi looga dhigay, sabab iyo mid lagu diidaba .

# QAYBAHA XUKUNKA TAKLIIFIGA AH

Waxaa inaka khuseeya arinkaasi waa inaan ogaano in xukunka takliifiga ahi uu u kala baxo:

1. Xukun keensada fulinta amaro la dalbayo ama ka haridda kuwa la reebayo .
2. Iyo mid lakala dooransiiyey dadka oo ah xukun mubaax ah .

Qaybta hore ayaa ukla baxda dhowr xukun oo ah: waajib, sunne, xaaraan iyo mid makruuh ah (ama la necbe) .

# KALA ABLA-ABLAYNTA WAAJIBKA

Haddaba qaybta waajibka ayaa loo kala abla-ablayaa dhowr siyaabood:

1. Qayb loo eegayo waqtiga waxaana loo kala saara: mid waqti balaadhan haysta iyo mid waqti ciriiri ah haysta .
2. Qayb loo eegayo miqdaarka waajibka, waxaana loo qaybiyaa: mid la jaangooyey iyo mid aan la jaangoyn, kan hore waxaa loosoo qaataa salaada midka danbena waxaa loosoo qaataa arimaha ku saabsan waxay yeelanayso xaasku xaga nafaqada .
3. Qayb loo eegayo waajibka naftiisa oo loo kala qaado qayb cayiman sida hadii lagu yiraahdo quudi miskaas laguuna cayimo, iyo qayb aan la cayimin ama loo daayey kala doorashada qofka gudanaya waajibkaas sida kafaarada dhaarta.
4. Qayb loo eegayo qofka waajibka gudanaya oo loo kala saarayo markaas mid qof walba u yaal (الواجب العيني) iyo mid dadwaynaha u yaal (الواجب الكفائي) .

Waxaan uga gol lahaa kala abla-ablaynta aan soo sheegay inaan fahano meesha ay kasoo unkanto ama ay cuskanayso masuuliyada dad waynaha saaran, saad aragtayna waa qayb ka mid ah waajibaadka Ilaahay saaray adoomadiisa .

**Masuuliyad dadwayne, qeexideedii iyo daliilkeeda**

Waxaan markale iswaydiin karnaa muxuu yahay waajibka dadwaynuhu ama waajibka kifaa’iga ahi? Maxaa saldhig looga dhigaa ama ku tusinaya in waajib noocaas ah jiro? Goormuuse waajibkani isu bedelaa mid cayni ah ama shakhsi ku waajiba?

**Qeexida waajibka dadwaynaha iyo yoolka laga leeyahay:**

Waajibka dadwaynaha ama masuuliyadda dadwaynaha waxaa lagu qeexaa inuu yahay waajib hadii dadka qaar sameeyaan qaarka kale uu ka dhacayso canaanta, dhibka ama denbigu ama waa arin sharcigu go'aamiyey fulintiisa ayadoo ayadoon la eegayn fuliyaha .

Yoolka laga leeyahay ayaa wuxuu yahay in falka lala yimaado muhiimadna lama siin cida fulinaysa saas buuna kaga duwanyahay kan qofka la tix geliyey ee qof walba laga rabo inuu la yimaado ee loo yaqaan waajib cayni ah.

**Maxaa ina tusinaya in masuuliyad noocaan ah la iska rabo**

Waxaa asaas u ah waajibkan ayaado quraanka ka mida haba ugu cadaatee ayada Towba 122 taasoo ilaahay ku sheegay inaysan muslimiinta dhamaantood jihaadka u wada baxayn laakiin laga rabo ama lagu boorriyey in qayb walba kooxa ka midihi jihaadka u baxaan kuwa Kalena cilmiga diinta sii bartaa dadkana ay ku waaniyaan.

﴿ وَمَا كَانَ الْمُؤْمِنُونَ لِيَنفِرُوا كَافَّةً ۚ فَلَوْلَا نَفَرَ مِن كُلِّ فِرْقَةٍ مِّنْهُمْ طَائِفَةٌ لِّيَتَفَقَّهُوا فِي الدِّينِ وَلِيُنذِرُوا قَوْمَهُمْ إِذَا رَجَعُوا إِلَيْهِمْ لَعَلَّهُمْ يَحْذَرُونَ﴾[14]

Sidoo kale aayada 104 ee suurada Aala cimraan ilaahay waxa uu muslimiinta faray inay ka mid ahaadaan ayaga dad diinta dadka fara oo dacwada faafiya.

﴿ وَلْتَكُن مِّنكُمْ أُمَّةٌ يَدْعُونَ إِلَى ٱلْخَيْرِ وَيَأْمُرُونَ بِٱلْمَعْرُوفِ وَيَنْهَوْنَ عَنِ ٱلْمُنكَرِ ۚ وَأُوْلَٰئِكَ هُمُ ٱلْمُفْلِحُونَ ﴾[15]

Labadaas ayaayadood ayaa waxay noqonaya asaaska uu ku taaganyahay waajibka kifaa'iga oo aan ku sheegay inuu yahay mid dadwayne, gaar ahaan markii aayada danbe xarafka (    ) ee ku jira lagu macneeyo inuu yahay mid sheegaya qayb ee uusan ahayn mid loola jeedo cadayn.

## GOORMUU MID CAYNI AH QOF U YAAL ISU BEDELAA.

Asal ahaan saan soo sheegay masuuliyada waajibkaan waa mid dadwaynaha u taal, laakiin waxaa jiraysa marar uu qof dusha ka fuulayo ama isu bedelaayo mid qofeed meeshii uu ka ahaa mid dadwayne.


Waxaan si kooban ugu sheegayaa hoos dhowr jeer oo uu isu rogo mid qofeed meeshii uu ka ahaa mid dadwayne.

5. Waxa uu noqdaa mid qofeed marka cida xukunka haysaa ay u diraan qof dadka ka mid ah wax dadwaynaha u yaalay , tusaale ahaan in wadooyinka la hagaajiyo oo dadka loo furo wadooyin ay maraan wixii dadka dhibayana laga qaado waxay qofkaas loo igmaday ku noqonaysaa waajib qofeed oo asaga u yaal ayna tahay inuu fuliyo ka gaabintiisuna ay noqonayso denbi uu keligii qaadayo, arinkaas waxaa ku tusaaya tusiyaal badan oo diinta ka mida waxaase inakaga filan hadalka suubanaha -nabadgelyo korkiisa ha ahaatee- ee uu dadka farayo hadii jihaadka la idiiku yeero usoo baxa (وإذَا اسْتُنْفِرْتُمْ فَانْفِرُوا) maxaa yeelay waajibka jihaadku waxa uu ahaa mid dadwayne ama kifaa'i ah laakiin marka uu qofka ugu yeero masuulka sare ee dowladu waxa uu ku noqon asaga mid waajib si gaara ugu ah.
6. Markii uu qofku nadro inuu wax daacad ah oo masuuliyad dadwayne ah inuu sameeyo sida asagoo yiri agoon baan wax u qaban waana nadray inaan saa sameeyo.
7. Inuu bilaabo arin waajib dadwayne ahaa, sida asagoo dhex galay inuu qof aaso am kafmo marka bilaabida uu bilaabay bay culimada qaar ku tagsanyihiin inay waajib kaga dhigayso inuu dhameeyo mar haddii xaq dadwayne u ku dhex jiro arinka uu wado.
8. Waxaa qofka waajib kaga dhigaya sidoo kale haddii uu u maleeyo inaan waajibkaan ama masuuliyadaan cidina qaban.
9. Sidoo kale wuxuu waajib qofeed noqonayaa marka aan cid kale meesha joogin ama aan cilmi loo lahayn asaga mooyee markaas waxaa waajib ku noqonaysa qofkaas inuu fuliyo arikaas .

Intaas aan soo sheegnay oo dhan denbigii dadwaynaha loo haysan lahaa waxaa qaadaya qofka u ku waajibay dadwanahana wuu ka dhacayaa danbiga iyo masuuliyaduba.

Qormadaan mida xigta baan kusoo qaadan doonaa meelaha ugu badan oo masuuliyada dadwaynaha ama waajibka kifaa'iga ahi uu gelayo ama lagu dhaqayo, waxaad sugtaan si aan u dabaqno masuuliyadaas waa qormada danbe insha allah.

**W/Q:** Maxamed Nadiif Showkaani



Xigashada Sawirka: Crisis Group

# MAXAA HORTAAGAN IN LAGA GUULEYSTO AL-SHABAAB?

Maxamed Mire

Waxa uu ku xusay Dr. Maxamed Aadan Shiikh, buuggiisa "Waa Inoo Muqdisho" mar uu ka waramayey qorshaha Leegada (SYL) intii u dhaxaysay 1950-1960 – waa xilligii maxmiyada'e, sida uu ahaa, wuxuu ku tilmaamay in aysan ujeedkoodu uu dhaafsiisaneyn sidii loo dhalin lahaa gobanimada Soomaaliya oo aysan jirin-ba "Mashruuc bulsheed oo qeexan" oo dalka iyo dadkaba lagu hagi karo madaxbanaanida kadib, taasoo mar waliba ka dhigaysay gobanimada mid khatar gudeed wajahaysa, inta ay wajahaysay mid dibadeed.

Marka taas laga soo tago, waxaa aanu arkeynaa sidii habqanka ah ee dhaqdhaqaaqyadii ka soo horjeeday taliskii Maxamed Siyaad Barre ay ugu fashilmeen in ay hiraal ay dadku ku hirtaan loo curiyo, dharaartii uu ka cararay Muqdisho, oo waxay taasina ina dhaxalsiisay qaranjab iyo bur-bur bulesheed oo ilaa iyo hadda aanu la daalaadhacayno, xalna loo hayn.

Nasiibxumo, markii aad u fiirsatid sida uu Madaxweyne Xasan Shiikh u maamulayo dagaalka ku wajahan argagixisada waa mid qorshe la'aan iyo laab-lakac aan la heyn istiraaajiitiyad dagaal oo taabigal noqon karta, taas oo aan horseedi karin guulo wax-ku-ool ah, waxayna qorshe-la'aantaasi salka ku haysa dhacdooyinkii ina soo maray tan iyo xilligii maxmiyada oo aan waxba laga baran, mar welibana aanu ku dhacayno dabin aanu horey u soomarnay, waxaanna madaxweynaha maanta jooga u dheer in uu labba xilli ku soo noqday madaxtinimada Dalka. Welina uu halkii ka miisayo, qorshe xumada lagu wajahayo dagaalka argagixisada.

Mudada sideed iyo tobanka sano ah ee dagaalkalagu lagula jirey maleeshiyada Al-Shbaab welina aan wax guul ah oo lagu ciribtirayo laga gaarin, miisaaniyad sanadeedka dowladdu ay ku kharashgarayso 25% ciidamada dagaalka kula jira Al-Shabaab, waxay ka marag-kacaysaa sida hawlgalkaasi ballaaran ee naf iyo maalba ku baxay ay wax uga khaldanyihiin, una baahanyahay in dib-u-eegis dhan walba ah lagu sameeyo, oo aan kaliya lagu ekaan laab-lakac iyo xamaasad aan la heyn istiraatiijiyad dagaal oo dhaxal-reeb noqon karta.

Saddex sano ka hor, iyadoo Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliya (CXDS) iyo xoogaga iskood isku abaabulay ee Macawisleydu ay dagaalkii naf hurka lahaa lagu lari lahaa qorshe dagaal oo la fulin karo, maanta iyadoo la joogo 2025-ka waxaanu arki laheyn Al-Shabaab oo la wiiqay, lagana saaray dhammaan goobaha ay ka joogaan Hirshabeelle iyo Galmudug-ba, balse taas badalkeeda waxaanu arkeynaa Aadan Yabaal oo dib al-Shabaab u qabsatay iyo deegaanada kala ah; Masjid Cali Gaduud, Aboorey iyo saldhiga Wargaadhi, oo ay dib u soo weerareen, lana wareegeen, muddo kooban kadibna laga saaray.

**Haddaba, maxay yihiin cilladaha jira ee mar weliba Dowldu ay tallaabo qaado haddana ay dib u soo guranayso:**

- Ugu horreyn, waxaa xilka hogaanka CXDS la baddalay labbo jeer iyadoo sanadkii ugu horay ee dagaalku uu socday xilkaas uu hayey Janaraal Odowaa Yuusuf Raage, oo intabadan Ciidanku ay qirsanyihiin hoggaankiisa silloon ee Ciidanka, wuxuuna markale ku soo noqday hogaanka iyadoo laga dheehan karo, in laga fursan waayey hab-maamulkiisa tolmoon ee dagaalka, isbaddalkaas ku dhacaya hoggaanka sarre ee Ciidanka wuxuu saameen ku yaalanayaa hab-sami-socodka dagaalka, wuxuuna mar weliba keenayaa in uu ciidanku ku hawl-galo aragtiyo dagaal oo kala gadisan, maadaama aysan muuqaneyn Qorshe Qaran oo dagsan oo lagu wajihi karo Al-Shabaab.
- Mark labbaad, Maraykanku wuxuu joojiyey taageeridii ciidanka Danab kadib markii April, 2024-tii ay soo shaacbaxday in la lunsado agabka ciidanka iyadoo suuqa madow laga iibsado, waxay taas dharbaaxo ku aheyd qorshii luudaayey ee ladagaalanka Al-Shabaab, waxayna tuhun xoogleh galisay in ay jiraan xubno dowladda ka tirsan oo dhaqaale ka sameeya hawlgala la dagaalanka argagixisadda. Musuqa iyo maamul xumadu waxay wiiqeen awoodda dagaal ee ciidanka, welina waxaa muuqata in aan wax cashar ah laga baran khaladaadkii dhacay saddexdii sano ee xukuumadda hadda talada haysa.

- Marka saddexaad, kala qeybsanaanta siyaasadeed ee madaxda dowladda fadaraalka iyo maamul goboleedyada oo taagnaa labadii sano ee ugu danbeeyey, waxay ahayd awood siyaasadeed oo ka maqnayd fagaaraha lagu dhiso go'aanada la dagaalanka Al-Shabaab. Midowga madaxda Soomaalidu waxay keeni laheyd in uu jiro cudud siyaasadeed oo mideysan, kana dhan ah dagaalka argagixisada, kala qeybsanaantooduna waxay wiiqaysa dagaalka socda oo ah mid si buuxda ay tahay in ay uga wada qeyb-qaataan madaxda Soomaalidu.
- Ugu danbeyntii, sanadihii lasoo dhaafay CXDS waxay tabbabarro ka heleen 11 dal oo ay ka mid yihiin, Turkiga, Maraykanka, Imaaraadka Carabta, Midowga Yurub, iyo dalal Afrikaan ah, kala duwanaanta tabbabarrada ay ciidanku heleen, waxay saamayn ku yeelatay caqiidada militariga ee ciidanka, u hoggaansankooda, iyo qalabka dagaal ay ku hawl galayaan, taasoo ka dhigtay in ciidanka taageero ka helo waddamadaas siyaasad ahaan aan aragti mideysan ka laheyn arrimaha Soomaaliya, mid welibana uu dano isaga u gaar ah uu ka leeyahay ciidankaas uu tabbabarrayo, waxay saamayn tabban ku yeelatay ciidanka, oo hadda Madaxweynihii yimaada uu xoogga saarayo dalal isagu uu saaxiib dhow layahay, sida Ciidankii Eriteeriya oo dhawr kun gaarayey hadda aan meel lagu sheeki karin, iyagoo ku bur-buray kala duwanaanta siyaasadeed ee maamulkii hore iyo kan hadda jira. Taasina, ugu danbeyn waxay curyaamisay hawlgalada joogtadda ah ee lagula jiro Al-Shabaab, taasoo ka dhigaysa ciidanka in si fudud loo abuuri karo, loona kala diri karo.

Qorshe-xumadaas aan kor ku sheegnay waxaad si toos ah uga dheehan kartaa, Wasaaradda Gaashaandhigga oo saddex asbuuc gudahood loo magacaabay labbo Wasiir, waa xaruunta ay tahay in ay dejiso istiraatiijiyad waarta oo ka dhan ah dagaaalka muddadiisu dheeraaday ee Al-Shabaab lagula jiro, waxaanna si xoog ah isku soo taraysa in hawlgalka AUSSOM uu wajahayo dhaqaale la'aan baahsan, iyadoo aan la hayn dhaqaale gaaraya $96 milyan oo ah kharashka ilaa June sannadkan loo qorsheeyey, waxaanna laga hayaa keliya $16 milyan, mardhowna waxaa la arki doonaa isbadaladda siyaasadeed ee dalalka deeqda siin jirey Soomaaliya ay wajahayaan gudahooda iyo dhaqaala xumada baahsan ee Caalamka ka jirta in ay dhihi karaan "Soomaaliyeey isku tashta" taasinsa, hadda ayay saansaanteedii muuqataa, waanna in siyaasad gudeed oo mideysan laga yeeshaa.

Iskusoo duubo, sida uu sheegay Dr. Maxamed Aadan Shiikh, waxaa xalku noqon karaa in hiraal dheer laga yeesho arrimaha jiraalkeena taabanaya, oo aysan dhacdooyinka joogatda/maalinlaha ah aysan jiheyn dagaalka argagixisada aanu kula jirno, iyo in la daraaseeyo xaaladda hadda taagan oo la is waydiiyo, maxaynu 18 sano uga adkeen la'nahay Al-Shabaab, xagee ayey wax iska qabsan la'yihiin, ma heli waynay istiraatiijayad dagaal oo ka caagan danaha siyaasadda ee isbadalaya, sida la tijaabiyeyna haddii awooda dowlada iyo tan shacabku midoobaan waxaa la gaari karaa dhammaadka dagaalka argagixisadda.

**W/Q:** Maxamed Mire

ARAFAT
INTERNATIONAL HOSPITAL
SPONSER






# KA GUDBIDDA GARGAARKA DIBADDA:

## MAALGASHIGA CAAFIMAADKA PUNTLAND EE MUSTAQBALKA WAARA

Dr. Cabdisamad Dhunkaal




Xigashada Sawirka: WHO

Dagaalkii sokeeye ee muddada dheer socday, burburkii dawladnimada Soomaaliyeed iyo kala qaybsanaanta siyaasadeed ee ka dhalatay markii xukunka laga tuuray xukunkii militariga waxay si weyn u saameeyeen adeegyada bulshada aasaasiga ah, kaabeyaasha dhaqaalaha iyo horumarka guud ee dalka. Inkastoo horumar laga sameeyay dib-u-dhiska hay'adaha Soomaaliya, haddana nidaamka caafimaadka Soomaaliya wuxuu weli ku jiraa xaalad liidata oo uu la daalaa dhacayo caqabado waaweyn oo la xiriira dhismaha xarumaha, agabka iyo awoodaha dhamaan qaybaha nidaamka caafimaad ee wax-ku-oolka ah.

Ka hor intii aanu bilaaban dagaalkii sokeeye, adeegyada caafimaadka aasaasiga ah dadka shacabka ah ayaa si bilaash ah uga heli jiray goobaha caafimaadka ee ay dowladdu maamusho. Sidoo kale dalka waxaa ka jiray adeegyo caafimaad gaar loo leeyahay oo xadidan balse sii kordhayay, gaar ahaan magaalooyinka waaweyn sida Muqdisho. Tan iyo sanadkii 1991-dii, adeegyada caafimaadka ee dadweynaha waxay si weyn ugu tiirsanaayeen maalgelin toos ah oo dibadda ah, waxaana lagu bixiyaa barnaamijyo ay hirgeliyaan Qaramada Midoobay iyo hay'adaha samafalka sida Barnaamijka Xirmada Adeegyada Caafimaadka Aasaasiga ah (EPHS).

Barnaamijyadan waxay ujeedadoodu tahay in la gaarsiiyo bulshada danyarta ah iyo dadka nugul adeegyada caafimaad ee muhiimka ah sida daryeelka hooyada iyo dhallaanka, tallaalka, nafaqada, iyo daaweynta cudurrada faafa. Si kastaba ha ahaatee, baaxadda iyo daboolka adeegyada EPHS waa kooban yihiin, waxaana ka maqan qaybaha muhiimka ah sida cudurrada aan faafin, xaaladaha neerfaha iyo lafaha, qalliimada waaweyn, kansarka iyo cudurrada daba-dheeraada ee u baahan daaweyn iyo daryeel khaas ah.

Tan iyo wixii ka dambeeyay sanadkii 1991-dii, waxaa guud ahaan gobollada dalka si xawli ah uga hirgalay xarumo caafimaad oo gaar loo leeyahay. In kasta oo xarumahani la daalaa dhacayaan caqabado la xiriira tayada adeegga iyo awoodda bixinta adeegyada caafimaadka, haddana waxay noqdeen ilaha ugu waaweyn ee laga helo adeegyada caafimaad ee dalka. Sida uu sheegay Bankiga Adduunka, arrintani waxay keentay in 75% ilaa 80% bulshada Soomaaliyeed ay adeegyada caafimaadka ka bixiyaan jeebkooda, taasoo ka dhigtay in daryeelka caafimaad uusan qof walba si siman u helin, balse uu noqdo adeeg uu heli karo kaliya qofka haysta awood dhaqaale oo iskiis isku daaweyn kara.

Marka laga tago adeegyada caafimaadka ee dalka gudihiisa, dad badan oo awooda ayaa adeegyo caafimaad u doonta dalka dibadiisa. Tusaale, daraasad ay daabacday ha'yadda cilmi-baarista SIDRA 2024-kii ayaa sheegaysa in 31% dadka reer Puntland ee dibada caafimaadka u doonta ay yihiin kuwo ka waayay adeegii ay rabeen gudaha Soomaaliya, halka 41% dadka dibada caafimaadka u raadsada ay yihiin kuwo aan ku qanacsanayn adeegyada caafimaad ee dalka ka jira. Daraasadda SIDRA ayaa xustay in wadamada Hindiya, Malaysiya iyo Turkiga ay u badanyihiin wadamada ay dadka Soomaaliyeed u doontaan daaweynta caafimaad ee dibada, iyadoo ay soo raacaan wadamada deriska ah sida Itoobiya iyo Kiinya.

Walaaca ugu weyn ee xilligan taagan Soomaaliya oo dhan waa ku-tiirsanaanta adeegyada ee kaalmooyinka dibadda. Waxaa isa soo taraya walaac iyo niyadjab ay muujiyeen deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah, iyadoo qaar ka mid ah dalalka sida Mareykanka uu si rasmi ah u joojiyay deeqihii caalamiga ahaa ee horay loo marin jiray hay'adda USAID. Hay'addan ayaa ahayd mid laf-dhabar u ahayd taageerada adeegyada caafimaad ee dalka, gaar ahaan la tacaalidda cudurrada sida HIV/AIDS-ka iyo qaaxada.

Shirkii dhawaan Garoowe ay ku qabatay wasaaradda caafimaadka Puntland waxa uu ahaa shir muhiim ah wallow ay ahayd in mar hore uu baraarugaan bilaabmo. Wasiirka Caafimaadka Puntland Siciid Jaamac Qoorsheel waxaa uu shirka ka sheegay in 60% maanta aan la hayn taageerada dhaqaale ee caafimaadka oo dibada ka imaan jiray, taasoo keeni karta

in adeegii uu istaago, saamayna ku yeesho kumanaan dad ah.

Haddaba si loo helo adeeg caafimaad oo loo simanyahay, si fudud oo joogta ahna lagu heli karo, lehna tayo u qalanta muwaadinka, waxaan isleeyahay dhawrkan arimood oo waddanka si sahlan looga hirgalin karo ayaa noqon kara ilo dhaqaale:

1. **Canshuurta caafimaadka:** waa madaxyo canshuureed oo si gaar ah loogu maalgaliyo caafimaadka waddanka sida canshuur dheeri ah oo la saaro walxaha caafimaadka wax u dhima tusaale qaadka, tubaakada, sigaarka iwm, canshuurta ka soo xeroota ganacsiga caafimaadka iwm, lana kordhiyo qoondada wasaaradda caafimaadku ka hesho miisaaniyadda guud ee Puntland si loo gaaro hiigsiga SDG ee 15% miisaaniyadda dowladda in lagu bixiyo adeega caafimaadka sida ku xusan ballantii Midowga Afrika ee Abuja declaration 2001-dii. Taasi waxay keenaysaa in dowladdu ay bixiso dhaqaalaha looga baahanyahay adeega caafimaadka asaasiga ah si muwaadinku uu u helo xuquuqdiisa caafimaad oo bilaash ah, oo markasta iyo meelkasta laga heli karo.

2. **Iskaashi u dhexeeya dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay:** in ganacsatada iyo dowladduwadamaalgashadaanisbitaallada gobollada, dowladduna saamigeeda qiima dhimis u siiso muwaadiniinteeda iyadoo ay wada maamulayaan guddiga isgu jira dowladda iyo ganacsatada si loo helo adeeg caafimaad oo heerka 2-aad iyo -3aad ah.

3. **Hirgelinta caymiska caafimaadka:** kaasoo noqonaya mid bulsho oo dowladdu leedahay iyo mid gaar loo leeyahay iyadoo la hirgelinayo shuruucdii iyo nidaamkii lagu maamuli lahaa, taasoo keenaysa in muwaadinku awood u yeesho inuu helo adeeg caafimaad oo aan ku cuslayn jeebkiisa, ganacsadihii isbitaalka maalgaliyayna uu helo faa'iido dhaqaale si uu u sii huromariyo adeega loo xilsaaray.

4. **Qaaraan bulsho:** sida sakooyinka, waqafka iyo sadaqooyink kale taas oo lagu taageerayo dadka aadka u tabarta daran oo aan awoodin inay bixiyaan caymiska caafimaad.

5. **Dhiirigelinta maalgashiga:** in adeegyo caafimaad oo gaar loo leeyahay la dhiirigeliyo lana fududeeyo shuruucda iyo nidaamka ay u baahanyihiin si loo helo maalgashi iyo khibrad dibadeed taas oo muwaadiniinta dakhligoodu meel-dhexaadka yahay iyo kuwa dakhligoodu sareeyo u fududaynaysa inay helaan adeeg caafimaad oo u qalma heerkooda dhaqaale, ayna kaga maarmi karaan safarka dibada.

Si loo gaaro himiladaas, waxaa lagama maarmaan ah in la helo doonis iyo go'aan siyaasadeed oo ka yimaada madaxda sare ee dalka. Sidoo kale, waxaa muhiim ah in la dejiyo shuruuc iyo hannaan cad oo lagu maareeyo ilaha dhaqaale ee la xiriira adeegyada caafimaadka. Intaas waxaa barbar socda baahi loo qabo in bulshada lagu wacyigeliyo muhiimadda ilaalinta iyo adeegsigooda hufan ee ilaha dhaqaale ee loogu talagalay horumarinta adeegyada caafimaad.

**Tixraac:**

SIDRA Institute. (2024, December 26). Bridging gaps in healthcare: The case for a tertiary hospital in Puntland. https://sidrainstitute.org/bridging-gaps-in-healthcare-the-case-for-a-tertiary-hospital-in-puntland/

Nidaamka maamulka dhaqaalaha ee WHO 2010: ISBN 978 92 4 0684805

World Bank report 2021: https://data.worldbank.org/indicator/SH.XPD.OOPC.CH.ZS?locations=SO

World Nank report 2024: https://data.worldbank.org/indicator/SH.XPD.EHEX.CH.ZS?locations=SO

**W/Q:** Cabdisamad Dhunkaal

**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG